



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.bristol.sch.uk

Talaada 16^{da} Meey 2023

Gacaliyayaal Qoysas,

Xilligaan wuxuu ahaa mid mashquul badan iyadoo aan munaasabado kale aan qorsheyneyno! Waxaa jiray booqashooyin, u-diyar-garow Karnafaal, qadada Ciidda iyo carruurta Fasalka 6 oo galay SATs.

Bogaadin weyn Fasalka 6 kuwaasoo si deggen u galay imtixaankoodii usbuuca hore. aad ayaan idiinkugu faaneynaa. Mahadsanidiin dhammaan shaqaalaha taageeraayey imtixaanka.

Dhinaca shaqaaleynta, waxaan ku faraxsannahay inaan kooxda Cabot ku soo dhaweyno Shanthay Wright. Waxay caawineysaa dhammaan ardayda dugsiga iyadoo doorkeedu yahay Kaaliye Waxbarasho Caawiye.

Fasalka 4 waxay ku mashquulsanaayeen in ay ku matalaan dugsiga tartan ciyaareed iyo dabbaaldega muusikada – Bogaadin Fasalka 4.

Fasalka 1 waxay hoggaan u noqdeen fadhiga-guud maalintii Jimcaha kaasoo ku saabsanaa cinwaankooda Kenya. Mahadsanidiin Fasalka Y1.

Naadiga Waqtiga-Dugsiga-Ka-Dib ee Injineerinka waxay sameeyeen qolfoof baabuur (gaari) alwaax ah kaasoo ay ku jiraan qalab elektaroonik ah kaasoo dhaqaajinaaya baabuurka. Bogaadin.

Waxaan ku faraxsannahay inaan idiin sheego in aan wareysi shaqo galay oo la ii oggolaaday inaan noqdo Madaxa Maamulaha Joogta ah ee Cabot. Dhamaantiin waxaad igu soo dhaweynseen dugsiga waxaanna u riyaqsannahay inaan arko sida aan **Si** wadajir ah u sii shaqeyn karno si aan Cabot ugu dhigno Meesha ugu wanaagsan ee canug walba. Adiga iyo carruurtaadaba waxaad tihiin lafdhabarka bulshada dugsiga; Waxaan dareemaayaa inaad aad ii qiimeyseen inaad ii oggolaateen inaan qeyb idinkala noqdo arrintaan.

Mahadsanidiin,

Mrs L-H

Taariikhaha Xusuus-Qorka

22^{da} Meey Fasalka 5/ Fasalka 6 Kulanka RSE Education

29^{ka} Meey Fasaxa Dugsiga – Dugsiga ma jiro 5^{ta} Juun INSET – Dugsiga uma jiro carruurta

26^{da}/27^{ka} Juun Maalinta Xayawaan

1^{da} July – Karnafaalka St Paul (Fasalka 6 waxay qeyb ka yihiin qababqaabada arrintaan laakiin qof walba waa lagu casuumay iney ka soo qeyb galaan maalintaas. Waxaan fahamsannahay in maalintaas laga yaabo in ay noqoto Ciid , marka xafadda Cabot waxaa la qorsheeyey in lala wadaago dharka Fasalka 6.

3^{da} Juulaay Usbuuca Guriga

7^{da} Juulaay Warbixinta Waxbarashada

Isku beddelka buugaagta

Horraanta dugsiga waxaa yaalla Book Swap – fadlan buugaag ka qaado markaasna ama soo celi buugaagta markaad akhrisid ama ku kordhi book swap kuwaasoo aad akhrisay.

Tan waa hab wanaagsan dhammaanteen si aan u akhrinno buugaag badan una caawinno bey'adda.



Kursiga Saaxiibtinimada

Mahadsanidiin Guddiga Sinnaanta ee dugsiga kuwaasoo allifay fikradda Kursiga Saaxiibtinimada si loo noolaado. Waxaan rajeyneynaa in tan qof walba ay caawin doonto waqtiga biririfta ama qadada kuwaasoo in la tixgeliyo u baahan.



Guinea Pigs

Waxaa mahadsan Mrs Redwood iyo Miss Pimenta oo qorsheeyey noolayaal cusub in ay Cabot yimaadaan. Waxaa nagu soo biiray 2 guinea pigs. Fasallada ayaa mas'uul ka noqon doona nadaafadda sanduuqooda, quudintooda iyo dabcan salaaxiddooda. Waxaan rajeyneynaa in tan carruurta ka caawin doonto ku-baraarugsanaanta mas'uuliyadda iyo caafimaadka maskaxda.

Badbaadada Internetka

Badbaadada Internetka waa qeyb muhiim ah adduunka aan ku nool nahay.

Waxaan dugsiga ka maqalnaa carruur ka hadleysa isticmaalka Whats App si xor ah. Oo keli ah xusuusin da'da loo oggolyahay app waa 16.

Xataa, ciyaarta Fortnite waxay leedahay da' xaddidan oo ah 13. Mar kale, waxaan carruurta ka fileynaa in aysan gelin cinwaanka internetyadaas.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumbo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Rea ee xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630